

# sidan buu meel Kronan u noqo doonaa goob xasiloon mar kale

*Sababta laguugu soo direy waraqadaan waa maadama aad tahay waalid ama waalid masuul leh ilmo dhigta dugsiga Kronan. Warqadani waxay ku qorantahay luqado badan oo kala duwan. Warqadan oo ku qoran luqado badan oo kala duwan waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee [www.trollhattan.se/kronan](http://www.trollhattan.se/kronan)*

Wixii ka danbeeyey weerarkii lagu soo qaday dugsiga Kronan 22<sup>kii</sup> bishii oktoober Waxaa jira warar been abuur ah oo la faafiyey iyo hanjabaad, gaar ahaan lagu faafiyey internetka. Hanjabaadaasi kuma wajahna oo kaliya Kronan, ee waxay xitaa ku wajahantahay dugsiyada kale iyo dugsiyada xanaanada ee ku yaala Trollhättan iyo waliba magaalooyinka kale ee Iswiidhen. Ciidamada booliisku hanjabaadaa si dhab ah ayey u qaateen baadhitaan beeyna ku hayaan. Ilaa hadda waxaa ay hanjabaadaasi noqotay mid been abuur ah iyo wax la iska samaystay. Ciidamada booliisku si cad bey u xaqiijiyeen in aysan jirin wax hanjabaad ah oo ku wajahan Kronan ama dugsiga kale oo ku yaala Trollhättan.

Caruurta u baahan taageero iyo caawimaad, waxaa ay ka helayaan caawimaada iyo taageerada ay u baahanyihiin, bar-baariyayaasha, saaxiibada iyo shaqaalaha caafimaadka ardayda (elevhälsan). Dugsigu wuxuu wali xidhiidh dhow oo joogta ah oo wada shaqayneed la leeyahay ciidamad booliiska iyo hay'ada kale si loo adkeeyo/xoojiyo xasiloonida iyo nabadgalyada Kronan.

Waxbarashadu sidii caadigii bey ugu socotaa mar kale, ardayduna shaqadoodii iyo horumarinta aqoontoodaba halkii hore bey ka sii wataan. Taasina waa sida uu qabo xeerka dugsiyada iyo waxbarashada khasabka ah: in la damaanad qaado in dhamaan caruurta iyo ardaydu ay helaan waxbarashada ay xaqa u leeyiin ee ay u baahanyihiin si ay u helaan fursad ay ku gaadhaan hadfkooda (yolkooda) ama ay u rumoowdo riyadooda mustaqbalku.

Waxaan sidoo kale ku faraxsanahay in aan gacmo furan ku soo dhaweyno maamulaha cusub ee Kronan F-6! Oo magaceeda la yidhaahdaa Linda Forssén, waxaa ay hore uga shaqayn jirtay degmada Trollhättan. Waxaa hada ugu danbayntii ay ka timid oo ay maamule ka aheyd dugsiga cusub ee Lilla Edet. Waxaa kale oo Kronan heli doonaan oo lagu xoojin doonaa, talo bixiye (kurator) cusub. Waxaana magaceeda la yidhaahdaa Moa Fredriksson, waxaana ay hore uga shaqayn jirtay dugsiga Frälsegård, Laakiin dib bey ugu soo laabanaysaa Kronan marka ay ka soo noqoto fasaxa waalidnimada Linda iyo Moa waxaa inoola iman doonaan xirfadooda iyo waayo aragnimadooda, taas oo faa'iido weeyn u noqon doota aradyda iyo shaqaalaha Kronan F-6.

Waxaa kale oo maalmahan laga taagi doonaa banaanka hore ee Kronan geed qurux badan oo iftiimaya. Qofkii raba inuu xuso ama xasuusto dhibanayaashii wax ku noqdey weerarkii wuxuu ku shidi karaa shumac ama nal geedka dhexdiisa.

Qolyhayaga ka shaqeeya kronan waxaan rajeynaynaa in aan mar kale dib u bilowno in aan si caadi ah ugu shaqayno dhamaan aradayda, waxaan idinka damaanad qaadaynaa in aan samayno intii karaankaya ah in Kronan ahaado goob xasiloon iyo goob nabadgelyo, goob horumar, goob cilmi iyo goob waxbarasho. Haddii aad ka waalid ahaan qabto wax su'aal ah, ama uu joro wax aad is weydiinayso waxa aad mar kasta nagala soo xidhiidhi kartaa dugsiga.

Salaan diiran

**Djeno Mahic**  
Maamulaha Kronan F-9  
0520-49 72 82

**Birgitta Lundskog**  
ku simaha agaasimaha  
xarunta dhexe ee dugsiyada (Områdeschef, Centrala  
skolområdet)  
0520-49 64 50

Qaybta istaraatiijiyada qorshaynta iyo horumarinta  
Maamulka waxbarashada ee degmada Trollhättans  
Gårdhemsvägen 9  
461 83 Trollhättan